XAASHIDA AY KU QORAN TAHAY XOGAHA MUHIIMKA AH

# Fahamka Mas'uuliyad ka noqoshada iyo kormeerka qof ay maxkamada u amartay

Volunteers of America®
MINNESOTA AND WISCONSIN



## Goorma Ayaa Loo Baahan Yahay Mas'uuliyad ka noqoshada iyo kormeerka qof ay maxkamada u amartay?

- Nidaamyadan sharci ayaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto marka shakhsigu uu daciifo sababtoo ah cilladaha neerfaha garaadka (tusaale, Cudurka Alzheimer), dhaawacyada dhimirka, istaroogga, naafanimada maskaxeed/korriinka, ama baaritaanka caafimaadka maskaxda oo uu leeyahay baahiyo aan la daboolin kaas oo aan lagu dabooli karin qaab kale.
- Tallaabooyinkan waxaa la raacaa marka aan la heli karin waxyaabo kale oo xaddidan, sida dardaaranka daryeelka caafimaadka, awoodaha qareenka, iyo go'aan qaadashada qofka laga caawiyo.

## Waa maxay Masúul ka noqoshada?

Mas'uulku waa go'aan-qaade sharci oo ay maxkamaddu u magacawday qofka aan awood u lahayn inuu go'aan gaadho, oo baahidiisu aanay daboolayn, oo aan lahayn hab kale oo uu baahiyahaas ku daboolo.

## Waa maxay kormeerka qof ay maxkamada u amartay?

Kormeeruhu waa go'aan-qaade sharci oo ay maxkamaddu u magacawday qofka aan awood u lahayn inuu maamulo arrimihiisa maaliyadeed ama go'aannada, kaasoo qaba baahi dhaqaale oo aan daboolin, oo aan haysan waddo kale oo uu ku helo baahiyahaas.

## Noocyada Mas'uulada ka jira Minnesota:

### Mas'uulka Dawlada

Waxaa u magacaabay Wakiilka Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee MN shakhsiyaadka qaba ogaanshaha naafanimada garaadka/koriinka marka aan la helin mas'uul kale oo ku habboon.

### Masúul Gaar ah

Waxaa ku jira xubnaha qoyska, deriska, asxaabta, ama hay'adaha madaxa banaan (tusaale, xirfadlayaal, tabaruceyaal, qandaraasyada degmada, ururada).

## Waa maxay sababta ay u tahay Faragelinta ugu Xaddidan?

Mas'uuliyad ka noqoshada iyo/ama kormeerka qof ay maxkamada u amartay waxay meesha ka saaraysaa xaqa uu qofku u leeyahay madaxbannaanida iyo aayo-ka-tashiga.

# Fahamka Mas'uuliyad ka noqoshada iyo kormeerka qof ay maxkamada u amartay

**XAASHIDA AY KU QORAN TAHAY XOGAHA MUHIIMKA AH**

## Dheefaha mas'uuliyad ka noqoshada iyo/ama kormeerka qof ay maxkamada u amartay:

- Qaabka ugu sarreeya ee ilaalinta shakhsiyaadka u baahan beddelka go'aan gaarista
- Waxay xaqiijisaa oggolaanshaha daryeelka, iyo diyaarinta bixinta waxyaabaha daruuriga ah sida cuntada, dharka, hoyga, badbaadada, iyo kormeerka (masuulka) marka aysan jirin siyaabo kale oo sidaas loo sameeyo.
- Wuxuu maareeyaa arrimaha maaliyadda wuxuuna ka ilaaliyaa hantida xatooyada ama lunsiga (u xilsaarida qof daryeela) marka aysan jirin siyaabo kale oo sidaas loo sameeyo.
- Mas'uuliyiinta/Dadka kormeerka waxay kula xisaabtamayaan Maxkamadda falalkooda.

## Kharashyada iyo Khatarta Mas'uuliyada iyo Kormeerka ay u xilsaartay Maxkamadda:

- Waa hanaan aasaaskiisu waqti qaato
- Dhaawaca suurtagalka ah ee qofka
- Kharash lacageed oo sarreeya
- La'aanta qoyska ama saaxiibada la heli karo waxay u horseedi kartaa ku tiirsanaanta xirfadlayaasha, waxaana jirta la'aanta xirfadlayaasha u adeega
- Gaar u ahaanta dhaqanka ayaa noqon kara caqabad
- Luminta xuquuqda go'aan qaadashada waxay keeni kartaa niyad-jab iyo dabeecado qallafsan
- Mas'uuliyada laga yaabo inaysan xalinin dhibaatooyinka jiro

## Waxyaabaha Muhiimka ah:

- Mas'uuliyad ka noqoshada iyo kormeerka qof ay maxkamada u amartay ma aha lagamamaarmaan kaliya sababtoo ah awood la'aanta bixinta baahiyaha aasaasiga ah ama maaraynta dhaqaalaha *(eeg Xaashida ay ku qoran tahay xogaha muhiimka ah ee Beddelka Xakamaynta Yar leh).*
- Sharciga Minnesota wuxuu u baahan yahay in la isku dayo beddelaad xaddidan oo yar (tusaale, go'aan gaarista la taageeray, dardaaranka daryeelka caafimaadka, ama magacaabista qof wakiil ah) ka hor intaadan raacin mas'uuliyadda ama kormeerka ay u amartay maxkamadda.

## Wixii Kaalmo Dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah ama la tashi ah, fadlan la xiriir ilaha VOA ee soo socda:

**Center for Excellence oo la Iskaga caawiyo Go'aan Gaarida**

**Khadka Laga helo Xogaha Daryeelka Ilmaha:** 952-945-4174 *(khadka lacag la'aanta ah 844-333-1748)*

**Iimayl:** cesdm@voamn.org

**Websaydka:** www.voamnwi.org/cesdm

Volunteers of America® MINNESOTA AND WISCONSIN

CESDM CENTER FOR EXCELLENCE IN SUPPORTED DECISION MAKING

*Agabyadan waxaa lagu sameeyay taageero laga helay Deeqaha Minnesota ee Dadka Da' kasta leh ay heli karaan. Turjumaada agabyadan waxaa lagu taageeray maalgelin ka timid Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota, Qeybta Adeegyada Gabowga iyo Naafada.*